



**BANDHIG FURSAD SHAQO KOOBAN OO KU SAABSAN QORIDDA BUUGAAGTA  
DUGSIYADA HOOSE EE PUNTLAND**

Taariikh: 24ta Abriil, 2019

Mudanayaal;

Akhristayaasheena sharafta leh waxaan halkan idiin kugu soo gudbineynaa fursado shaqo oo muddo kooban ah oo ka banaan Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, kuna saabsan qoridda buugaagta dugsiyada hoose (1-4). Hadaba haddii aad daneyneysid inaad ka faa'iideysato fursadan wax ka ogow, xogta iyo macluumaadka hoos ku qoran:

<b>Nooc shaqada</b>	Diyaarinta Buugaagta Ardayga iyo kuwa hagaha ee Maadooyinka Dugsiga Hoose
<b>Muddada Shaqada</b>	90 Maalin shaqo (90 working days) oo ka billaabata 15/05/2019 ilaa 15/08/2019.
<b>Xilliga Shaqada</b>	Lix (6) maalin shaqa oo asbuucii ( Sabti – Khamiis)
<b>Goobta shaqada</b>	Xarunta Tababarka Macallimiinta ee Garoowe (GTEC).
<b>Gunnada/Mushaarka loo qorsheeyay shaqadaan</b>	Gunada shaqada dhamaystirka manhajka iyo buuga hagaha waa \$5400 (Shan kun iyo afar boqol oo dollar) oo la canshuurayo
<b>Habka loo bixinaya (Payment Schedule):</b>	Gunnada waxaa loo bixin doona jadwalka soosocda: 1. 40% waxaa la bixinaya marka la dhameystiro boqolkiiba 50 shaqada guud. 2. 30% marka la soo gudbiyo qaybyo qoraalka hore oo dhameystiran. 3. 30% marka shaqada la dhamaystiro Guddiga Manhajkuna ku qanco shaqa la qabtay.
<b>Agabka:</b>	Waxaad isticmaalaysaa Computerkaaga, waxaa kale oo lagu diyaarinayaa buugaag kala duwan oo aad ka tixraacdo qoraalkaaga.

Wixii su'aal ah la soo xiriir: +252907794564/+252907753555 ama e-mailka:  
bartacayn@gmail.com